



Kahortaga Wasaqda Xarumaha Cuntada

Barnaamijka **Ilaalinta Waraha Biyaha ee Ismaamulka San Diego** ayaa ka taageeraaya ganacsiyada dedaaladooda kahortaga wasaqda asagoo siinaaya Farsamooyinka ugu fiican ee Maamulka Biyaha Daadka (BMP-yada).

- ! Biyaha lagu siidaayo wadooyinka, majroorada, iyo biyaha daadka roobka ee Ismaamulka San Diego AYAAN LA DAAWAYN kahor intaysan gelin waraha deegaankeena, webiyada, iyo badwaynta. Dhammaan ilaha wasaqda ayaa mamnuuc ka ah inay ka baxaan gurigaaga ayna galaan biyaha wadooyinka ama daadka roobka. Keliya biyaha roobka ayaa loo oggol yahay inay maraan wadooyinka iyo kanaallada daadka. **Tilmaamahaan kahortaga wasaqda ee maqaayadaada ayaa naga caawin doona nadiifinta marinadeena biyaha.**

Maaraynta Olyada

- Si joogto ah u nadiifi olyada iyo qashin qabtayaasha.
- La xariir olyo dhaqaha si qaab joogto ah looga shaqeeyo loona bixiyo qashinka saliida.
- Si joogto ah u nadiifi oo ula soco meelaha lagu kaydiyo qashinkaaga saliida.
- Qabo oo ku xaree saliida la adeegsado, wasaqda saliida, iyo dareereyaasha saliida qasaca qashinka saliida. Haku shubin saliida, olyada, iyo dareereyaasha saliida siinka, marinka biyaha daadka, ama godka qashinka.
- Si adag u xir qasacyada qashinka saliida. Xir daboolka marka ay suuragalayso.
- Si amaan ah ugu xaree qasacyada saliida qashinka ah heerka dhlka ama aag xakamaysan si looga difaaco qasacyada inay soo dhacaan.
- Si joogto ah u nadiifi meelaha marwaxada saliidu qabsato (marwaxadaha qashinka saliida ka saara saqafka).
- Adeegso baafka qashinka aruursha si aad u qabato saliida da'aysa ee kasoo daadata marwaxadaha saliida qabta.

tilmaamo dheeraad ah >>>

waan
difaaci karnaa
marinadeena biyaha

ayadoo la qaadayo keliya
dhawr talaabo.



Haddii aad u baahan tahay xog dheeraad ah, wac Laynka Tooska ah ee Daadka Biyaha (888) 846-0800 ama booqo www.sandiegocounty.gov/stormwater ee WPO.



Gudaha dhismeyaasha

- ❑ Xaaq oo tirtir dhulka maalin kasta.
- ❑ Adeegso shabaq ama dhuuqeyaal si aad u qabato waxyaabaha adkaha ah.
- ❑ Dhaq sijaayadaha, miireyaasha, iyo qasacyada qashinka kuna dhaq siinka tirtirista ama aaga loo asteeyay.
- ❑ Haddii sijaayaduhu aad u wayn yihiin oo aan gudaha lagu dhaqi karin, u dhiib shaqaalaha wax dhaqa.
- ❑ Ku shub biyaha leh saabuunta, warankiilada, ama sunta jeermiska disha siinka tirtirista.

Banaanka

- ❑ Tirtir oo haawi qashinka iyo wasaqda cuntada maalin kasta.
- ❑ Keen qasacyo leh daboollo si aad uga hortagto in qashinku firdho.
- ❑ Nadiifi aagaga qashinka iyo meelaha xiran adoo adeegsanaaya "qaababka nadiifinta ee qalalan" oo ka xaaq xashka. Haddii aad adeegsanayso aaga qashinka lagu shubo, a shaqee dadka kale si aad u nadiifiso aaga qashinka lagu shubo aadna u xaqiijiso in godka qashinka la daboolo marka aan la isticmaalayn.
- ❑ La soco biyaha maraaya aaga waraabka oo isku dubarid dayactirka aaga waraabka si aad uga hortagto in qashinka kasoo dareera beeraha uu galo marinka daadka.
- ❑ Haddii qaababka nadiifinta ee qoyan la adeegsado, meel ku shub dhammaan biyaha dhaqmada si aysan u gelin marinka biyaha roobka.

Tababarka Shaqaalaha

- ❑ Tababar dhammaan shaqaalaha si ay uga shaqeeyaan nidaamka BMP-yada biyaha roobka, kahortaga wasaqda, iyo nadiifinta waxa daata.
- ❑ Ku hayso diiwaannada tababarka goobta.

Si aad u hesho xog dheeraad ah iyo fikrado kale, waydii wakaaladaha maxaliga ah ee caafimaadka iyo bulaacada, ka fiiri waraaqaha wararka ee ururka ganacsiga, iyo joornaallada.

- ❗ Ku siidaynta wasaqda si toos ah ama si dadban nidaamka biyaha roobka qaada ama marinnada biyaha waxay kasoo horjeedaa Xeerka Ilaalinta warta biyaha ee Ismaamulka (WPO). **Ganacsigaaga waxaa laga doonayaa inuu ku dhaqmo WPO iyo shuruudaha kore ee ugu yar ee BMP-yada.**

Waad ku mahadsan tahay

inaad doorkaaga ka qaadatay difaacida kanaaladeena biyaha.



Haddii aad u baahan tahay xog dheeraad ah, wac Laynka Tooska ah ee Daadka Biyaha (888) 846-0800 ama booqo www.sandiegocounty.gov/stormwater ee WPO.